



لجنة أفريقيا للإغاثة
AFRICAN RELIEF COMMITTEE
A.R.C

# مسارات خيرية CHARITABLE PATHS

جمعية الرحمة العالمية
Rahma International Society

Warside bille ah oo ay soo saarto hay'adda Gargaarka Africa 'ARC'

(7PAGE) WED ,2 APRIL 2022 Shacbaan 1443 Hargeisa-Somaliland


## ARC Oo Soo Kormeertay Suuqa Waaheen, Sheegtayna Gacanta Ay Ka Geysan Doonto caawimada



Eeg bogga2aad>>

## ARC Oo 46 Qof Siisay Tababarro U Diyaarinaya Suuqa Shaqada



Eeg bogga2aad>>

### Arday Agoon Ah Oo Looga Faa'iideyey Mashruuca Qaybinta Hilbaha

Hay'adda Gargaarka Afrika ayaa hilib u qaybisay 60 arday oo ka mid ah agoonta dhigata xarunta waxbarashada ...

Eeg bogga 4aad>>

### Kulanka Waalidiinta Xarunta Waxbarashada Al-nuur Ee Boorama

Maamulaha dugsiyada Al-nuur ee magaalada Boorama mudane Cabdiraxmaan Camuudi oo ay weheliyaan ...

Eeg bogga 5aad>>

### Ciyaar Dhexmartay Laba Ka Mid Ah Dugsiyada Hoos Yimaadda ARC

Xafiiska hay'adda gargaarka Afrika ee Muqdisho Soomaaliya, ayaa qabanqaabiyey ciyaar kubadda cagta...

Eeg bogga 6aad>>

### Kooxda Al-Nuur Ayaa Qaadday Koobka Dugsiyada Boorama

Kooxda kubadda cagta ee xarunta waxbarashada Al-nuur ayaa ku guulaystay koobka ciyaaraha dugsiyada ...

Eeg bogga 6aad>>

### Tababar Lagu Dhisayo Xirfadda Macallimiinta Qur'aanka kariimka

Xarunta waxbarashada ee Kuweytiga ayaa tababar u qabatay barayaasha rugaha xiftiga Qur'aanka Kariimka ah ee raacsan Kuweytiga ...

Eeg bogga 6aad>>

### Maamulaha Mashaaruuca Waxbarashada Ayaa Soo Indha-Indheeyey Xarumaha Mgaalada kala ah Burco Iyo Laascaanood

Madaxa Mashruuca waxbarashada ee hay'adda Gargaarka Afrika – ARC, mudane Ciid Cabdalladiif ayaa booqasho u kuurgelis ah...

Eeg bogga 6aad>>

### Wasiirka Waxbarashada Jamhuuriyadda Somaliland Oo U Kuurgalay Dugsiga Sare Ee Xarunta Waxbarashada ee Kuweytiga

Wasiirka waxbarashada iyo sayniska ee jamhuuriyadda Somaliland oo hawlo shaqo ugu yimid maamulka hay'adda Gargaarka Afrika...

Eeg bogga 5aad>>

### Afar Ceel Oo Ay Ka Faa'idaysanayaan Dad Ka Badan 1500 Oo Qof

Hay'adda Gargaarka Afrika ayaa deegaanno kala duwan oo Soomaaliya ah ka hirgelisay, Shan ceel biyood...

Eeg bogga 4aad>>

### Masaajid Cusub Oo ARC Ay Ka Hirgelisay Caasimadda Hargeysa

Hay'adda Gargaarka Afrika – ARC ayaa Masaajid cusub ka hirgelisay xaafadda Jigjiga yar ee magaalada Hargeysa...

Eeg bogga 5aad>>

### Arday Ka Qalinjebisay Dugsiyada Farsamada Gacanta Ee Boorama

Agaasinka xarumaha waxbarashada hay'adda Gargaarka Afrika – ARC ee Boorama ayaa qabtay munaasabad ...

Eeg bogga 4aad>>

### Mgaalada Burco Oo Laga Furay Xarunta Qur'aanka Kariimka Ah

Hay'adda Gargaarka Afrika ee ARC ayaa magaalada Burco ee jamhuuriyadda Somaliland ka hirgelisay xarun...

Eeg bogga 5aad>>

### Afar Qoys Oo Ka Faa'idaystay Barnaamijka Xoogsi Xalaal Ah

Hay'addda Gargaarka Afrika ayaa kaariyoonnada saddexda shaag leh iyo badeecad ganacsi oo saaran siisay afar ka mid ah haweenka ...

Eeg bogga 3aad>>

# ARC OO SOO KORMEERTAY SUUQA WAAHEEN, SHEEGTAYNA GACANTA AY KA GEYSAN DOONTO CAAWIMADA



Guddoomiyaha guud ee hay'adda Gargaarka Afrika – ARC, Dr. Cabdiraxmaan Almucallimi iyo hawlwadeennada maamulka iyo qaybaha kala duwan ee hay'adda ayaa soo inda-indheeyey xaaladda suuqa Waaheen ee magaalada Hargeysa oo dhowaan uu dab baabi'iyey. Waxa ay soo qiimeeyeen khasaaraha uu geystay dabkan oo baabi'iyey afar meelood saddex ka mid ah suuqa, masiibo bani'aadamnimo oo aan la qiyaasi karinna ka tegey.



Mudane Cabdikariim Axmed Mooge, duqa caasimadda Hargeysa oo suuqa Waaheen ku qaabilay Dr. Mucallimi iyo waftigiisa ayaa uga warramay tirakoobyada illaa hadda la hayo ee khasaaraha ka dhashay dabkan. Waxa uu sheegay in tirakoobyada hordhaca ahi ay tilmaamayaan in wadarta guud ee khasaaraha maaliyadeed uu u dhexeeyo hal iyo badh illaa laba bilyan oo doolarka Maraykanka ah, laakiin ay weli iska soo daba dhacayso xogtu. Sidaas awgeed dib laga ogaan doono tirakoobka rasmiga ah ee khasaaraha. Dhinaca kalana Dr. Mucallimi ayaa sheegay sida uu uga xunyahay khasaaraha dhacay, isaga oo caddeeyey in ay xanuunka la qaybsanayaan shacabka dhibaatadu soo gaadhay iyo xukuumadda Jamhuuriyadda Somaliland. Waxa aanu Alle u weydiiyey in uu cawilnaq khayr qaba siiyo dadka dhibaatadu ka soo gaadhay masiibadan.

Dr. Mucallimi waxa uu sheegay in hay'adda ARC ay xog fiican ka qaadatay xaaladda dhabta ah ee jirta, si dhowna ula soconayso hadba wixii ka soo kordho, iyada oo dadaalkeeda isugu geynaysa in ay gacan kasta oo suurtagal ah ka geysato gargaarka iyo caawimada muwaadiniinta Somaliland ee dhibaatadu soo gaadhay, gaar ahaan ganacsiyada hoose ee dadka meheradaha, dukaamada, iyo miisaska ganacsi ku lahaa suuqa ee uu dabku ka baabi'iyey.



## ARC Oo 46 Qof Siisay Tababarro U Diyaarinaya Suuqa Shaqada



Hay'adda Gargaarka Afrika – ARC ayaa magaalada Hargeysa tababarro la xidhiidha xirfadaha beeraha iyo dawaarka ugu soo xidhay, 46 qof oo isugu jira rag iyo haween. Masuuliyiin dawladda ka socda, culimada diinta, waalidiin iyo marti sharaf kale oo badan ayaa ka soo qaybgalay munaasabad lagu maamuusayey tababartayaasha oo ka dhacday xarunta Kuweytiga.

Qaybta beeraha ee mac-hadka farsamada gacanta xarunta Kuweytiga Hargeysa ayaa muddo bil ah Tababar la xidhiidhada beerashada iyo nidaamka guriga cagaaran (Greenhouses) siinayey 15 arday oo laga soo xulay gobalka Sanaag. Dhinaca kalana 31 hablood ayaa uu macadka Farsamada Gacanta ee Xarunta Kuweytigu u dhammeeyey Tababar la xidhiidha xirfadda tolista iyo nashqadaynta dharka. Gebogebadii tababarkoodana mid kasta waxaa munaasabaddan lagu guddoonsiiyey Dawaar (Makiinad) loogu talagalay in ay ku shaqaystaan. Maamulaha mashaariicda Horumarinta ee hay'adda Gargaarka Afrika, mudane Xuseen Mutawalli oo munaasabadda hadal ka jeediyey ayaa sheegay in qalinjebinta dhalinyaradani ay tahay marag kale oo muujinaya sida mac-hadyada farsamada gacanta ee xarunta Kuweytiga ay uga go'antahay in ay hore ugu sii socdaan geeddiga kobcinta xirfadaha iyo mihnadaha kala duwan, si loo gaadho ujeedada udub dhexaadka u ahayd aasaaska mac-hadyada xirfadaha iyo farsamada gacanta ee hay'adda ARC ay ka hirgelisay magaalooyinka Hargeysa, Burco iyo Boorama. Xildhibaan Siciid Maxamed Ismaaciil (Sokeeye) oo ka tirsan golaha wakiillada Somaliland ayaa isaguna hadal uu ka jeediyey munaasabadda waxa uu bogaadiyey dadaalka dhalinyaradan la geliyey si looga caawiyo in ay ka baxaan marxaladda ku tiirsanaanta dhaqaale una bartaan xirfad ay ku xoogsadaan. Xildhibaanku waxa uu sheegay in hablaha ka Qalinjebiyey waxbarashada xirfadaha iyo mihnadaha kala duwani ay ka qaybqaadanayso xoojinta dhaqaalaha qoyska.

Dhinaca kalana waxa uu ammaanay in dhalinyarada tababarka beeraha la siiyey laga soo xulay gobalka Sanaag, isaga oo sheegay in deegaankaasi uu yahay carro-san dihin sidaas awgeed laga soo saari karo dalag beereed ay ka faa'idaysato Somaliland oo dhammi. Waxaa isaguna munaasabadda ka hadlay Dr. Cabdiraxmaan Mucallimi, guddoomiyaha guud ee hay'adda Gargaarka Afrika – ARC, waxa aanu hoosta ka xariiqay in waxyaabaha ay ARC muhiimadda siiso uu ka mid yahay in dad loo diyaariyo suuqa, lagana shaqeeyo dhismaha qof naftiisa iyo umaddaba u wanaagsan. Taas oo ka bilaabanaysa in qofka laga saaro xaaladda uu gargaarka u baahanyahay, lanageeyo marxald uu isku tashan karo, waxsoosaarna yeelan karo, si uu kaalin ka qaadaato dhismaha iyo horumarka bulshadiisa.

Dr. Mucallimi waxa uu bogaadiyey ardayda tababarka dhammaysatay oo uu sheegay in ay maanta guranayaan midhaha dadaalkii ay muddada bixinayeen, isaga oo u mahadnaqay bareyaasha dadaalka geliyey iyo martisharafta waqtigooda u hurtay in ay farxadda kala qaybgalaan.

Dr. Mucallimi waxa uu hay'adda ALRAXMA ee dawladda Kuweyt uga mahadnaqay taageerada iyo caawimooyinka joogtada ah ee ay la garabtaagan yihiin guud ahaan dunida, gaar ahaanna walaalahooda Soomaaliyeed ee gobalka Geeska Afrika.

Ugu dambayntii ardayda dhammaysatay tababarrada tolmaha, waxaa la guddoonsiiyey 31 makiinadaha dawaarka ah oo loogu talagalay in ay kaga qaybqaataan daboolista baahiyahooda qoys, isla markaana ka caawiyaan in ay suuqa shaqada ku galaan.

Mashruuca tababarka tolmaha iyo bixinta dawaarku waxa uu qayb ka yahay Barnaamijka Xoogsi xalaal ah ay hay'adda ARC ka fuliso goballada kala duwan ee Somaliland iyo Soomaaliya, waxa aanay ujeedadiisu tahay xoojinta koritaan dhaqaale oo waara, iyo shaqoabuurka. Halka mashruuca tababarka beeruhu uu qayb ka yahay Mashaariic noociisa ah oo ay iska kaashadaan ARC iyo hay'adda NRC ee dalka Norway oo maalgelisa.

# Wasiirka Waxbarashada JSL Oo Booqasho Ku Yimi Xarunta ARC



Wasiirka wasaaradda waxbarashada iyo tacliinta sare ee jamhuuriyadda Somaliland, Mudane Axmed Maxamuud Diiriye ayaa booqasho u xogogaal noqosho ah ku yimi xarunta hay'adda Gargaarka Afrika – ARC. Wasiirka oo uu wehelinayey guddoomiyaha waxbarashada ee gobalka Maroodijeex mudane Cabdiraxmaan Yuusuf, waxaa xarunta ARC ku soo dhoweeyey guddoomiyaha guud ee hay'adda Mudane Dr. Cabdiraxmaan Almucallimi oo ay wehelinayaan madaxa waaxda mashaariicda iyo Barnaamijyada samafal ee ARC iyo madaxa xidhiidhka dadweynaha ee xarunta waxbarashada Kuweytiga. Wasiirku muddadii uu booqashada ku joogay xarunta waxa uu maamulka ARC kala xaajooday, hawlaha samafalka ee la gaadhsiin karo ardayda qoysaska ka barakacay deegaannada kala duwan ee ay abaaruhu dhibaatada gaadhsiiyeen. Waxa uu wasiirku caddeeyey in deegaanno aad u badan oo Somaliland ah ay abaaruhu saamayn taban ku yeesheen, taas oo sababtay in ay barakacaan dadka deegaanka ahaa oo ay ku jiraan arday aad u tiro badan oo ku qasbanaaday in ay dugsiyada waxbarashada ka tagaan. Arrintan ayaa keentay in xukuumadda Somaliland ay hay'adaha gargaarka ee ka shaqeeya Somaliland iskaashi kala yeelato sidii loo garab istaagi lahaa ardaydaas, loogana caawin lahaa khatarta ka iman karta dayacaadda waxbarasho ee ku dhacday sannad dugsiyeedka 2021- 2022 oo hadda dhammaad ku dhow.

Ugu dambayntiina mudane Cabdiraxmaan Almucallimi ayaa wasiirka u sheegay hay'adda ARC iyo xarumaha waxbarashada ee hoostaga, kuwaas oo ka shaqeeya magaalooyin kala duwan oo dalka ahi in ay diyaar u yihiin in ay intii suurtagal ah gargaar waxbarasho gaadhsiiyaan ardaydaas.

## Olole Caafimaad Oo Ay Ka Faa'idaysteen 300 Oo Qof






Hay'adda Gargaarka Afrika oo kaashanaysa cisbitaalka Caalamiga ah ee Hargeysa HIH, ayaa adeeg caafimaad oo lacag la'aan ah siisay muwaadiniinta danyarta ah ee magaalada Hargeysa. Adeegyada caafimaad oo ka koobnaa dhammaan takhasusyada uu bixiyo cisbitaalku, waxaa ka faa'idaystay muwaadiniin tiradoodu ka badan tahay 300. Kuwaas oo boqol ka mid ah oo isugu jira carruur, haween iyo waayeel loo sameeyey baadhitaanno iyo shaybaadho kombiyuutarro ku jiraan oo xaaladdooda ku habboon. Bukaanka adeeggan loo sameeyey ayaa sida oo kale la siiyey dhammaan dawooyinka ay u baahnaayeen oo lacag la'aan ah. Mashruucan adeegga caafimaad ee lacag la'aanta ah, waxa uu qayb ka yahay Barnaamijka caafimaad ee ay ARC ka fuliso deegaannada iyo magaalooyinka Somaliland iyo Soomaaliya, iyada oo maalgelinta ka helaysa hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA.

## ARC Oo Biyo Gaadhsiisay 2800 Oo Ka Mid Ah Qoysaska Somaliland Ee Abaaruhu Saameeyeen



Hay'adda Gargaarka Afrika ayaa kolonyo gargaar ah u dirtay dadka ay dhibaatadu ka soo gaadhay abaaraha ka dhacay deegaannada Sabawanaag, Salaxley iyo degmada Faraweyne oo ka tirsan gobalka Maroodijeex ee caasimadda Somaliland. Hawlgalkan samafal ee ARC waxaa ka faa'idaystay 480 qoys, taas oo la qiyaasayo in ay gaadhay in ka badan 2800 oo qof. Mashruucan ayaa qayb ka ahaa ololaha gargaar ee ARC, ay ugu talagashay dadka ay biyo la'aantu ka soo gaadhay abaaraha ka jira deegaanno ballaadhan oo dhulka Soomaalida oo dhan ka mid ah.

## ARC Iyo NRC Oo Iska Kaashaday Tababar Dhinaca Beeraha Ah



Hay'adda gargaarka Afrika ee ARC oo kaashanaysa xafiiska Somaliland ee hay'adda NRC oo laga leeyahay Norway, ayaa Tababar dhinaca beeraha ah siisay qaybo ka mid ah beeraleyda gobalka Sanaag ee Somaliland.
Tababartayaasha oo 15 ruux ahaa ayaa muddo bil ah la siinayey casharro iyo tilmaamo la xidhiidha aasaaska waxbeerashada iyo nidaamka loo maro. Qaybta hore ee tababarka waxaa lagu qabtay magaalada Ceerigaabo, halka qaybtiisa dambe la keenay beeraha ALRAXMA ee hay'adda ARC ay ka hirgelisay Hargeysa, si ay tababartayaashu ugu qaataan duruus tusid iyo taabsiin ah.
Mashruucani waxa uu qayb ka yahay mashaariicda kobcinta dhaqaalaha bulshada ee ay labadan hay'adood doonayaan in ay qoysaska Saboolka ah kaga saaraan duruufaha saboolnimada, gaadhsiiyaanna heer ay iyagu waxsoosaar sameeyaan, naftoodana ku tiirsanaan karaan. Taas oo muhiim u ah wanaajinta nolosha bulshada iyo guud ahaan dhaqaalaha waddanka. Mashaariicda kobcinta iyo Horumarinta dhaqaalaha bulshada ee ay hay'adda ARC ka hirgeliso Somaliland, Soomaaliya iyo dawlad deegaanka Soomaalida waxaa ka caawiya hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA.

## Afar Qoys Oo Ka Faa'idaystay Barnaamijka Xoogsi Xalaal Ah



Hay'addda Gargaarka Afrika ayaa kaariyoonnada saddexda shaag leh iyo badeecad ganacsi oo saaran siisay afar ka mid ah haweenka danyarta ah ee degmada Boorama, jamhuuriyadda Somaliland. Tallaabadan ayaa qayb ka ah mashruuca 'Xoogsi xalaal ah' oo u jeedadiisu ay tahay shaqo abuur si loo xoojiyo horumarinta koboc dhaqaale oo waara. Mashruuca Xoogsi Xalaal ah oo ay hay'adda ARC fuliso iyada oo gacan ka helaysa hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXAM ee dalka Kuweyt, ujeedadiisu waa in muwaadiniinta laga saaro shaqo la'aanta iyo baahida, lana geeyo duruuf waxsoosaar oo ay kaga qayb qaadan karaan dadaallada xoojinta dhaqaalaha guud ee bulshada iyo dalkaba.

## 15 Qoys Oo Loo Qaybiyey Adhi Dhaqasho Ah



Hay'adda Gargaarka Afrika ee ARC ayaa 45 neef oo adhi ah u qaybisay 15 qoys oo ka mid ah dadka Saboolka ah ee deegaanka magaalada Jowhar, caasimadda dawlad-gobaleedka Hirshabeelle. Waxa aanay qoys kasta siiyey laba neef oo dheddig iyo mid lab ah.
Mudane Cabdiraxmaan Al-Thaamir, madaxa mashaariicda ee ARC ayaa sheegay in ujeedada mashruucani ay tahay in danyartu ay ka faa'idaystaan iibka caanaha neefafkan, isla markaana ay dhaqdaan, si ay uga dhigtaan il waxsoosaar oo ay ku kaabaan nolol maalmeedkooda. Waxa aanu qayb ka yahay mashruuca ballaadhan ee 'Xoogsi Xalaal ah', kaas oo hay'adda ARC oo kaalmo ka helaysa hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA ay ugu talagashay in dadka Saboolka ahi ay ka baxaan xaaladda ku tiirsanaanta, una gudbaan xaalad waxsoosaar oo ay noloshooda iyo guud ahaan dhaqaalaha bulshada kaabi karaan.

# Arday Agoon Ah Oo Looga Faa'iideeyey Mashruuca Qaybinta Hilbaha



Hay'adda Gargaarka Afrika ayaa hilib u qaybisay 60 arday oo ka mid ah agoonta dhigata xarunta waxbarashada ee Al-nuur ee magaalada Boorama, Jamhuuriyadda Somaliland. Ujeedada mashruucan ayaa ah in ardayda dugsiyada la siiyo, nafaqaynta lagama maarmaanka u ah Ubadka, si looga caawiyo waxbarashada isla markaana la hortago cudurrada nafaqadarrada ka dhasha. Mashruucan ayaa qayb ka ah Barnaamijyada samafalka bulsho ee ay hay'adda Gargaarka Afrika ka fuliso deegaanno iyo magaalooyin kala duwan oo ka mid ah Somaliland, Soomaaliya iyo dawlad deegaanka Soomaalida, iyada oo kaalmo ka helaysa hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA ee dalka Kuweyt.

## Madaxweyne Ku Xigeenka Puntland Oo Kutubta Manhajka U Qaybiyey Ardayda Xarunta Al-amal




Madaxweyne ku xigeenka Puntland, mudane Axmed Cilmi Cusmaan iyo wasiirka Barbaarinta iyo waxbarashada sare mudane Cabdillaahi Maxamed Xasan, ayaa ka qaybgalay xaflad xadhiga lagaga jarayey qaybinta kutubta manhajka waxbarashada dugsiyada hoose ee Puntland. Xafladaas oo lagu qabtay xarunta waxbarashada Al-amal ee magaalada Garoowe, ayaa madaxweyne ku xigeenka oo ka hadlay uu bogaadiyey dadaalka wasaaradda waxbarashada ee Horumarinta iyo fududaynta hawlaha waxbarashada, iyo sida oo kale taageerada ay joogtada ula garab taagan tahay xarunta waxbarashada samafalka ah ee Al-amal oo waxbarasho heerkeedu sarreeyo siisa ardayda gaar ahaan agoomaha.
Wasiirka waxbarashada ayaa isaguna dhinaciisa, hay'adda ARC uga mahadnaqay danaynta iyo daryeelka agoonta. Waxa aanu ARC ku bogaadiyey adeegyada iyo mashaariicda ay gaadhsiisay Puntland. In ka badan boqol arday oo ah agoon la kafaalaqaaday ayaa xarunta Al-Amal ka hela waxbarasho, hoy iyo nolol dhammaystiran. Waxaana mashruucaas hirgeliyey hay'adda ARC oo maalgelin ka helaysa hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA.

## 5 Ceel Oo Ay Ka Faa'idaysanayaan Dad Ka Badan 1500 Oo Qof

Hay'adda Gargaarka Afrika ayaa deegaanno kala duwan oo Soomaaliya ah ka hirgelisay, Shan ceel biyood oo leh dararkii xoolaha laga waraabinayey iyo qalab-gacmeedka biyo soosaarista. Ceelashan oo mid kasta uu raacsanyahay dar muggiisu yahay 10 illaa 15 Mitir Kiyuubik, waxaa laga dhisay deegaannada Kismaayo iyo Baladweyne, waxaana ka faa'idaysanaya in ka badan 250 qoys oo qiyaas ahaan u dhigma 1500 oo qof.
Ceelashani waxa ay qayb ka yihiin dadaalka ay hay'adda ARC ku doonayso in ay muwaadiniinta ka gacansiiso helitaanka biyo nadiif ah oo la cabbi karo, si loo xakameeyo khataraha abaaraha ee sababa, in muwaadiniin tiro badani aanay awoodin in ay helaan biyo ku filan oo nadiif la cabbi karo ah.
Faahfaahinta shanta ceel iyo tirada dadka ka faa'idaysan kara ayaa ah sidan hoose ku xusan:

| Lr. | Ceelka | Deegaanka | Faa'idaystayaasha |
|---|---|---|---|
| 1 | Ceelka Dr. Salaax Al-Raawi | Baladweyne | 50 Qoys |
| 2 | Ceelka Salaax Khawaa Almardaani | Kismaayo | 50 Qoys |
| 3 | Ceelka Nuura Haabis Alcutaybi | Kismaayo | 50 Qoys |
| 4 | Ceelka waraabka | Baladweyne | 50 Qoys |
| 5 | Ceelka Salaax Al-atab | Baydhabo | 50 Qoys |

## Xarunta Kuweytiga Oo Isu Imaanshiyo Aqoon Korodhsi iyo Tamashle Ah U Samaysay Ardayda



Xarunta waxbarashada Kuweytiga ee magaalada Hargeysa ayaa isu imaanshiyo tamashle iyo aqoon korodhsi ah u soo saartay ardayda dugsiga sare. Kulankan oo ahaa kii labaad ee sannadkan ayaa ay ujeedadiisu ahayd, xallinta duruufaha nafsadeed ee ay da' yartu inta badan la kulanto muddada koritaanka iyo in laga caawiyo kobcinta garaadkooda, isfahamka dhexdooda iyo aqoontooda. Sida oo kalana, tamarta togan ee ku duugan looga faa'ideeyo isbeddel dhinaca wanaagsan ah. Isu imaanshiyahan oo hal-ku-dheggiisu ahaa "Marka uu muuminku dareemo macaanka iimaanka", waxa uu ahaa saddex maalmood oo la qabanayey hawlo iyo barnaamijyo kala duwan oo isugu jiray aqoon korodhsi, duruus Qur'aanka Kariimka ah, tababaro la xidhiidha dhismaha qofka; sida wada shaqaynta, qiyamka qumman iyo muhiimadda Barashada xirfadaha, si loo helo shakhsi isu dheellitiran dhinac kasta; nafsad ahaan, xidhiidhka bulsho, aqoon ahaan iyo diin ahaanba.
Waxa kale oo ardayda lagu tababaray isxilqaanka, xil-gudashada iyo masuuliyad qaadista iyo in firfircooni lagaga qaybqaato arrimaha danta guud ee bulshada. Waxaa taas u barbar socday ciyaaraha iyo maadayska ardayda lagu maaweelinayey, muddadii ay tamashlaha ku jireen, iyada oo ugu dambayntiina la geeyey goobta dabbaasha ee Batalaale ee magaalada Hargeysa.
Xarunta waxbarashada ee Kuweytigu waxa ay ka mid tahay xarumaha hoostaga mashaariicda waxbarashada ee hay'adda Gargaarka Afrika – ARC oo maalgelin ka hesha hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA ee dalka Kuweyt.



## Arday Ka Qalinjebisay Dugsiyada Farsamada Gacanta Ee Boorama

Agaasinka xarumaha waxbarashada hay'adda Gargaarka Afrika – ARC ee Boorama ayaa qabtay munaasabad lagu maamuusayey, ardayda kaalmaha hore ka gashay imtixaanaadkii qalinjebinta Mac-hadka Farsamada gacanta iyo xirfadaha ee Boorama. Sida oo kalana lagu sagootinayey guud ahaan ardayda dhammaysatay Mac-hadka.
Munaasabaddan oo sida oo kale ujeedadeedu ahayd in ardayda kale lagu dhiirrigeliyo in ay maraan jidka kuwaas guulaystay. Waxaa ka qaybgalay maamulka mac-hadka Farsamada gacanta iyo qaybo ka mid ah macallimiinta iyo hawlwadeennada. Waxaa isaguna goobjoog ka ahaa kormeerka guud ee xafiiska ARC ee magaalada Boorama mudane Cabdalqaadir Axmed. Gebagebadii munaasabadda ayaa guud ahaanba ardayda qalinjebisay oo tiradoodu 25 ahayd, la guddoonsiiyey xidhmooyin qalabka farsamada gacanta ah, si ay ugu shaqo tagaan. Mashruucan ayaa qayb ka ah Barnaamijka 'Xoogsi xalaal ah' oo ay fuliso hay'adda iyada oo gacan ka helaysa hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA.



# Wasiirka Waxbarashada JSL Oo U Kuurgalay Dugsiga Sare Ee Xarunta Kuweytiga



Wasiirka waxbarashada iyo sayniska ee jamhuuriyadda Somaliland oo hawlo shaqo ugu yimid maamulka hay'adda Gargaarka Afrika - ARC, ayaa sida oo kale booqasho u kuurgal ah ku soo maray dugsiga sare ee xarunta Kuweytiga oo hoos yimaadda hay'adda. Wasiirka oo uu wehelinayey guddoomiyaha waxbarashada ee gobalka Maroodijeex, muddadii uu indha-indhaynayey habsami u socodka hawlaha dugsiga, waxa uu la hadlay ardayda fasallada Afaraad ee dugsiga sare oo uu faham fiican ka siiyey arrimo la xidhiidha waxbarashada. Waxaa ka mid ahaa manhajka, xogo la xidhiidha imtixaanaadka shahaadiga ah ee sannadkan, qaabka ardaydu uga qaybgasho deeqaha waxbarasho ee la siiyo ardayda dugsiyada sare dhammaysata ee dalka iyo arrimo kale. Ardayda ayaa iyaguna wasiirka weydiisay, su'aalaha ay ka qabaan arrimaha aynu xusnay ee uu kala hadlay. Halkaas oo uu wasiirku jawaabo iyo faahfaahino fiican ka siiyey ardayda oo ugu dambayntii uga mahadnaqday waqtigiisa uu ku sharfay. Waftiga wasiirka waxaa dugsiga ku qaabilay mudane Xasan Muuse, maamulka dugsiga Sare ee xarunta waxbarashada Kuweytiga. Maamulka iyo madaxda waxbarashada ee hay'adda ARC ayaa iyaguna wasiirka uga mahadnaqay kulanka uu ardayda la qaatay oo raad togan oo nafsadeed iyo farxad ku abuuray ardayda iyo bareyaashoodaba.



## Burco Oo Laga Furay Xarunta Qur'aanka Kariimka Ah

Hay'adda Gargaarka Afrika ee ARC ayaa magaalada Burco ee jamhuuriyadda Somaliland ka hirgelisay xarun xiftiga Qur'aanka iyo Barashada culuumtiisa ah. Xaruntan oo ka kooban laba fasal oo si buuxda u qalabaysan ayaa ku fadhida dhul cabbirkiisu 70 Mitir dhanyahay, waxa aanay qaadaysaa 60 arday. Ujeedada xaruntan ayaa ah in ay kaalin barbaarineed ka qaato waxbarista iyo Barbaarinta ardayda wiilal iyo gabdhaba, si looga badbaadiyo foolxumada akhris-qoraal la'aanta, loona kobciyo aqoontooda iyo waxbarashadooda. Waxa kale oo ujeedooyinka Mac-hadka ka mid ah in uu da' yarta Qur'aanka xafidda ka kobciyo dhinaca culuumta shareecada ee lagama maa maanka ah, iyo sida oo kale culuumta nolosha ee kala duwan. Mashruucani waxa uu kaalin ka qaadanayaa dadaalka u adeegista Qur'aanka Kariimka ah iyo ka qaybqaadashada dhismaha xarumaha Barbaarinta Ubadka, waxa aanu qayb ka yahay mashaariicda dhisme ee ay hirgeliso hay'adda gargaarka Afrika oo maalgelin ka helaysa hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA.



## Masaajid Cusub Oo ARC Ay Ka Hirgelisay Caasimadda Hargeysa



Hay'adda Gargaarka Afrika – ARC ayaa Masaajid cusub ka hirgelisay xaafadda Jigjiga yar ee magaalada Hargeysa. Masaajidkan oo halkii mar ay ku tukan karaan 133 qof, waxa uu ku fadhiyaa dhul bedkiisu dhan yahay 80 Mitir oo labajibbaaran, waxa aanu leeyahay xamaamyadii iyo goobtii weysada. Masaajidkan oo maalgelintiisa waqaf looga dhigay Ibtisaam Sabaax Al-Fadqam (AHUN), ayaa odayaasha iyo culimada dinta ee xaafadda oo furitaankiisa ka hadlay ay sheegeen baahida ay dadka ku dhow u qabeen. Dhismaha masaajidkani waxa uu qayb ka yahay mashaariicda dhismaha samafalka ah ee ay hay'adda Gargaarka Afrika – ARC ka fuliso deegaannada kala duwan ee Somaliland iyo Soomaaliya, iyada oo maalgelinta ka helaysa hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA ee dalka Kuweyt.

## Isku Xidhka Ardayda Xarunta Waxbarashada Al-Amal Ee Garoowe



Qaybta kormeerka hawlaha barbaarinta ee xarunta waxbarashada Al-amal ee magaalada Garoowe, Puntland ayaa bilowday Mashruuc xidhiidh wanaagsan oo saaxiibtnimo lagaga dhex abuurayo ardayda hoyga ee lagu daryeelo xarunta Al-Amal.
Waxaa ardayda lagu dhiirrigeliyey dhaqangelinta mabda'a ah in samaha iyo Alle ka cabsiga la isu kaashado, haddii ay tahay dhinaca waxbarashada ama xiftiga Qur'aanka Kariimka ah oo ay iyagu iska dhegeystaan, iyo sida oo kale ducada iyo xuska Alle iyo dhaqangelinta anshaxa Islaamka ee ay ka bartaan xarunta.
Mashruucan oo sii socon doona illaa dhammaadka sannad-dugsiyeedka 2021 / 2022, waxa uu qayb ka yahay mashaariicda Barbaarinta waxbarashada ee ay maamulaan mashaariicda waxbarasho ee ay hirgelisay hay'adda ARC. Waxa aanu muhiimad weyn u leeyahay sarraysiinta iyo adkaynta qiyamka Barbaarinta Islaamka ku dhisan ee dhammaan ardayda wax ka barata xarumahan.

## Kulanka Waalidiinta Xarunta Waxbarashada Al-nuur Ee Boorama




Maamulaha dugsiyada Al-nuur ee magaalada Boorama mudane Cabdiraxmaan Camuudi oo ay weheliyaan masuuliyiinta iyo macallimiinta waxbarashada dugsiyadan, ayaa 8 Maarso 2022 kulan ballaadhan la yeeshay waalidiinta ardayda kala duwan ee wax ka barata dugsiyadan oo ay ku jiraan kuwa farsamada gacantu. Kulankan waxaa la iskaga xaal waraystay waxbarashada iyo xaaladda guud ee xarunta, isla markaana lagaga tashaday sii Horumarinta iyo kobcinta lagu gaadhi karo yoolka guud ee xarunta oo ah in ardaydu ay hesho waxbarasho iyo barbaarin heerkeedu sarreeyo. Waxaa iyaguna kulankan ka soo qaybgalkooda ku sharfay Isuduwaha wasaaradda waxbarashada iyo tacliinta sare ee gobalka Awdal Mudane Nuur Cali iyo kormeeraha xafiiska hay'adda ARC ee Boorama mudane Cabdiqaadir Axmed.
Mid ka mid ah waalidiinta oo ku hadlay afkooda ayaa ammaanay horumarka la taaban karo ee ay xarunta waxbarashada ee Al-nuur ku tallaabsatay sannadihii la soo dhaafay, dhinaca kalana waxa uu waalidka ku baraarujiyey in ay ka soo baxaan kaalintooda Barbaarinta, dhiirrigelinta iyo waxbarashada ardayga iyo in ay xidhiidh joogto ah la yeeshaan dugsiga si ay xogogaal ugu noqdaan xaaladaha ardayga iyo waxbarashada.
Isuduwaha wasaaradda waxbarashada ee gobalka oo kulanka hadal ka jeediyey ayaa ka warramay muhiimadda ay leedahay waxbarashadu iyo in wasaaraddu ay mar kasta u heellantahay gacansiinta iyo taageerada xarunta waxbarashada Al-nuur iyo qaybaheedaba, taas oo ay ku jirto danta Ubadka muwaadiniinta ah ee wax ka barta.
Dugsiyada iyo xarunta Alnuur ee magaalada Boorama waxaa hirgelisay, hay'adda gargaarka Afrika oo taageero ka helaysa hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA ee dalka Kuweyt.



## Tababar Lagu Dhisayo Xirfadda Macallimiinta Qur'aanka Ee Xarumaha Kuweytiga

Xarunta waxbarashada ee Kuweytiga ayaa tababar u qabatay barayaasha rugaha xiftiga Qur'aanka Kariimka ah ee raacsan Kuweytiga. 11 Bare ayaa qaatay tababarkan oo la xidhiidhay xirfadaha looga baahan yahay macallinka xiftiga Qur'aanka Kariimka ah.
Ujeedada tababarka ayaa ahayd diyaarinta macallimiinta qur'aan xiftisiinta iyo in la siiyo aqoonta iyo xirfadaha barbaarineed iyo cilmi ee lagama maarmaanka u ah hawshan qiimaha badan ee ay hayaan. Sheekh khadaer Ahmed Abdi oo tababarkan bixinayey ayaa sida oo kale tababartayaasha siiyey duruus la xidhiidha qorsheyaasha iyo habraacyada casriga ah ee kor u qaadi kara adeegga waxbarasho ee ay u hayaan bulshada, iyo kaalinta ay ku leeyihiin Barbaarinta iyo waxbarashada ardayda. Si macallinka ay ugu suurtagasho in uu kobciyo ardaydiisa, isla markaana uu siiyo xirfadaha uu kula macaalimayo kala duwanaanshiyaha shakhsiyadeed ee ardayda, sida kala duwanaanshiyaha dhaqso u xafidista Qur'aanka, carrab wanaaggooda dhinaca akhriska iyo ku fiicnaanta qaab akhriska qur'aanka (Tajwiid) iyo ilaalinta kitaabka ay wax ka baranayaan.
Xarunta Kuweytigu waxa ay ka mid tahay mashaariicda miisaanka weyn leh ee ay hay'adda Gargaarka Afrika ka hirgelisay Somaliland iyada oo maalgelin ka helaysa hay'adda Caalamiga ah ee AL-RAXMA oo dalka Kuweyt laga leeyahay.

## Maamulaha Mashaaruuca Waxbarashada Ayaa Soo Indha-Indheeyey Xarumaha Burco Iyo Laascaanood




Madaxa Mashruuca waxbarashada ee hay'adda Gargaarka Afrika – ARC, mudane Ciid Cabdalladiif ayaa booqasho u kuurgelis ah ku tegey xarumaha waxbarashada ee Daaru-xannaan ee magaalada Burco iyo xarunta Al-mustaqbal ee magaalada Laascaanood, Somaliland.
Booqashadan oo uu Mudane Ciid ku soo indha-indhaynayey habsami u socodka hawlaha waxbarashada ee xarumahan, waxa kale oo uu ku soo maray dhammaan qaybaha iyo waaxyaha raacsan xarumahaas, waxa aanu xogogaal u noqday baahiyaha jira ee ay buuxintoodu lagama maarmaanka tahay si loo xoojiyo tayada adeegyada ay bixiyaan. Gaar ahaan dhinaca adeegga ardayda wax ka barata xarumahan iyo qaybta agoomaha ah ee lagu daryeelo.
Mudane Ciid waxa uu bogaadiyey dadaalka ay maamulka iyo hormuudka shaqaalaha goobahaas uu booqday geliyeen, bixinta adeegyo heerkoodu sarreeyo. Isaga oo ammaanay dadaalka ay ugu jiraan sii horumarinta adeegga bulshada iyo rumaynta riyada ARC ee ah 'Dhismaha qofka'.

## Kooxda Al-Nuur Ayaa Qaadday Koobka Dugsiyada Boorama

Kooxda kubadda cagta ee xarunta waxbarashada Al-nuur ayaa ku guulaystay koobka ciyaaraha dugsiyada dhexe iyo sare ee degmada Boorama. Kooxda ayaa muddadii ay ciyaaruhu socdeen soo bandhigtay ciyaaro aad u heersarreeya iyo anshaxwanaag. Kormeeraha guud ee xafiiska hay'adda gargaarka Afrika ee Boorama, mudane Cabdiqaadir Axmed ayaa hambalyeeyey kooxda. Kormeeraha oo ka hadlay munaasabaddii ay kooxdu koobka ku guddoomaysay ayaa sida oo kale bogaadiyey cid kasta oo kaalin uun ka qaadatay dhismaha, daryeelka iyo xirfadda ciyaareed ee kooxdan, laga bilaabo maamulka xafiiska illaa agaasinka waxbarashada iyo dugsiyada iyo dhammaan macallimiinta iyo hawlwadeennada kale. Ciyaaraha iyo maweeladu waxa ay ka mid yihiin Barnaamijyada Barbaarinta iyo waxbarashada ee dugsiyada Al-nuur iyo guud ahaan dugsiyada ay gacanta ku hayso hay'adda ARC oo ay maalgeliso hay'adda Caalamiga ah ee AL-RAXMA oo dalka Kuweyt laga leeyahay.





## Macallimiinta Xarunta Al-Xannaan Oo Tababar Muhiim Ah La Siiyey



Mudane Ciid Cabdiladiif, maamulaha mashaariicda waxbarashada ee hay'adda ARC oo booqasho hawleed ku tegey xarunta Alxannaan ee magaalada Burco, ayaa Tababar siiyey bareyaasha xarunta waxbarashada qaybaheeda kala duwan.
Tababarkan oo cinwaankiisu ahaa 'Sarrayntu waa astaanteenna' ayaa uu mudane Ciid Cabdalladiif xoogga ku saaray, in macallimiinta uu fahamsiiyo xeerka anshax ee xarumaha waxbarashada ee ay maamusho ARC. Waxa aanu ku boorriyey in ay ilaaliyaan xeerkaas anshaxa, kana shaqeeyaan rumaynta riyada xarumahan oo ah in ay hormuud u noqdaan waxbarashada wanaagsan iyo tayada aqoonta iyo ardayda ay soo saarayso.
Macallimiinta tababarka la siiyey ayaa iyaguna dhankooda bogaadiyey waxtarka casharrada ay qaateen, waxa aanay ka warrameen muhiimadda ay leeyihiin iyo qaabka ay u dhaqangelinayaan.
Dhinaca kalana mudane Ciid Cabdilladiif waxa uu booqday fasallada waxbarashada ee xarunta Alxannaan, isaga oo macallimiinta iyo ardaydaba u jeediyey talooyin ku habboon waxbarashada, sida oo kalana ardayda wax ka weydiiyey casharrada ay barteen muddadii ay dhiganayeen xaruntan.




## Ciyaar Dhexmartay Laba Ka Mid Ah Dugsiyada Hoos Yimaadda ARC

Xafiiska hay'adda gargaarkaAfrika (ARC) ee Muqdisho Soomaaliya, ayaa qabanqaabiyey ciyaar kubadda cagta ah oo ay iskaga hor yimaaddeen ardayda dugsiyada Alfaatix iyo Sheekh Daa'uud ee magaalada Muqdisho, caasimadda Soomaaliya. Ciyaar adag oo xiise iyo xamaasad badan lahayd, ayaa ku dhammaatay jawi farxad, isu hibayn iyo damaashaad ah oo ay guushu laba gool iyo hal gool ku raacday ardayda dugsiga Sheekh Daa'uud. Waxa aana isla goobtii lagu guddoonsiiyey koobkii ciyaarta loogu talagalay.
Dugsiyadan ayaa ka mid ah mashruuca waxbarasho ee ay ARC oo kaalmo ka helaysa hay'adda ah ee ALRAXMA, ka fuliso deegaannada kala duwan ee Somaliland, Soomaaliya iyo dawlad deegaanka Soomaalida Itoobiya.



AFRICAN RELIEF COMMITTEE

A.R.C

لجنة أفريقيا للإغاثة

AFRICAN RELIEF COMMITTEE

أثــرٌ .. يبقى

@africanreliefco

مسارات خيرية

CHARITABLE PATHS